



Baaritaanka sii Joogitaanka Barnaamijku waxa uu u saamixi doonaa Ardayda inay Dugsiga ku Sii Nagaadaan kadib u Baylaha COVID-19

Qoysaska PPS ee Qaaliga ah,

Iyadoo faafitaanka COVID-19 uu dugsiyada ku yar yahay, Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay fiirinayaan sida loo kordhinayo wakhtiga ardaydu fasalka ku qaadanayaan inta aafadan cudurku socoto. Waxaanu ku faraxsannahay inaanu ku dhawaaqno inaanu soo gabagabaynayno moodada "Baaritaanka sii Joogitaanka" ee dugsiyadayada.

Barnaamij Baaritaanka sii Joogitaanka ah, ardayda u baylaha cudurka COVID-19 intay dugsiga joogaan waxay sii wadan karaan inay dugsiga yimaadaan waxaana lagu baari doonaa dugsiga maalmo gaar ah inta lagu jiro labada toddobaad ee xiga. Ardayda aan wax astaamo ah muujin ee natiijada baaritaankoodana laga waayo cudurka marnaba laga rabi maayo inay karantiil galaan. Baaritaanka sii Joogitaanka waxa loogu talagalay dadka aan tallaalnayn ee bilaa astaamaha ah ee ku sugan dugsiyada iyadoo afaabkuna yahay wax cid kasta laga rabo.

Moodada Baaritaanka sii Joogitaanka [waxa taageeray Waaxda Waxbarashada Oregon](#). Waxaanu soo gabagabaynaynaa qorshayaal aanu ku bilaabayno barnaamijka Janaayo annagoo isla markaa la shaqaynayna maamulka caafimaadka dadwaynaha ee deegaankayaga. Waxaanu siin doonaa tabobar iyo taageero hoggaamiyayaasha dhismayaasha waxaanan kordhin doonaa xiriirka ku saabsan jadwalada iyo baaritaanka ee ku aaddan qoysaska.

Si aad gacan uga gaysato fududaynta shaqada, waxaad saxeexi kartaa foomka oggolaanshaha ee baaritaanka BinaxNOW, kaasi oo aanu siinaynay ardayda iyo shaqaalaha astaamaha leh ee dugsiyadayada ilaa gu'gii waxaanan u isticmaali doonaa Baaritaanka sii Joogitaanka sidoo kale. Foomka oggolaanshaha waxaad ka heli kartaa dugsigaaga, ama ka soo dejiso linkiyada hoose, kadibna saxeex oo ku soo celi dugsiga.

Foomka oggolaanshaha ee ardayda da'doodu tahay 15 iyo ka wayn:

- [English](#)
- [Español / Spanish](#)
- [Tiếng Việt / Vietnamese](#)
- [简体中文 / Simplified Chinese](#)
- [Русский / Russian](#)
- [Soomaali / Somali](#)

Foomka oggolaanshaha ee waalidiinta iyo masuulada ardayda da'doodu ka yar tahay 15:

- [English](#)
- [Español / Spanish](#)
- [简体中文 / Simplified Chinese](#)
- [Tiếng Việt / Vietnamese](#)
- [Русский / Russian](#)
- [Soomaali / Somali](#)
- [Tiếng Việt / Vietnamese](#)